Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

Qorsheynta Sanad Dugsiyeedka 2020-2021: Hagida ODDS ee loogu talagalay Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Qoysaska

Taariikhda:
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon waxay aqoonsan yihiin dhibaatada ay leedahay maareyntu dugsigu, adeegyada guriga dhexdiisa, iyo qoyska iyo nolosha shaqo inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19. Sababtani awgeed, ODDS ayaa soo saartay hagitaantani la cusbooneysiiyay oo lagu caawinayo qoysaska leh carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo dadka xirfad leh ee iyaga ka taageera in ay fahmaan doorka adeegyada ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-21.

adeegyada ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso, oo uu ka mid yahay adeeg bixiyuhu, ayaa loo isticmaali karaa oo kaliya in uu bixiyo natiijooyinka la rabo ee lagu aqoonsaday Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP) ee qofka dhallinyarada ah. Adeegyada ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso looma isticmaali karo taageerada waxbarasho, tilmaamaha iyo adeegyada ku jira Barnaamijka Shakhsiyadeed ee Waxbarasho (IEP), ha noqoto in la joogo guriga ama dugsiga. Tani waa xaddidaada federaalku ee dhanka adeegyada Medicaid ee la bixiyo iyada oo la adeegsanayo ODDS, ma aha xeerka gobolka ama ODDS.

Doorka Adeeg Bixiyaha:
Daryeelka adeeg bixiyaha waxaa ka mid ah la socodka, tilmaanta, wax is xasuusinta, taageerada heeganka la yahay, dhiirigelinta, dib-u-jihaynta, taageero gacanta laga qabanayo, iyo/ama dejinta taageerada ee loogu talagalay carruurta si loo qabto hawlo kala duwan guud ahaan maalintii. Kuwani waxaa loo yaqaan "hawlaha nolol maalmeedka" ama "ADLs" sida lebisashada iyo wax cunista iyo "hawlaha nolol maalmeedka muhiimka ah" ama "IADLs" sida diyaarinta cuntada. Intaasi waxaa dheer, in adeeg bixiyuhu ka caawin karo hawlaha caafimaadka la xiriira iyo waxqabadyada hab-dhaqanka wanaagsan. Hawlahan oo dhan waxaa lagu sharraxay Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP) ee carruurta.

Adeeg Bixiyaha iyo Dugsiga:

Inta lagu jiro sanad dugsiyeed caadi ah, daryeel adeeg bixiyaha lama bixin karo inta lagu jiro maalmaha dugsiga. Laakiin sanadkani waa mid sidii hore ka duwan. Xaaladaha qaarkood, daryeelka adeeg bixiyaha waxaa la bixin karaa inta ilmuhu hawlan yahay waxbarashada la kala joogo meel fog oo dhammeystiran iyada oo la adeegsanayo dugsiga degmada ee degaankiisa. Tusaale, ilme fiirsanaya cashar dhanka fiidiyowga ama dhiganaya fasalka dhanka internet-ka ah wuxuu u baahan karaa qaab loo dhigo, biyo la siiyo, iyo taageerada dhanka nadaafadda iyo biririfka musqusha, iyada oo daryeel bixiyuhu goobta joogo oo uu diyaar u tahay in uu bixiyo taageeradan marka lo baahan yahay. Kani waa mid la oggol yahay haddii baahiyaha lagu aqoonsado ISP ilmaha.

Daryeel bixiyaha ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso ma bixin karo wax barid, waxbarashada guriga, daryeel carruureed, ama adeegyada waxbarasho. Doorkiisu wuxuu ku egyahay caawinta ADL, IADL, hawlaha kale ee la xiriira caafimaadka iyo hab-dhaqanka oo dhaca guud ahaan maalintii sida lagu tilmaamay ISP ilmaha.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka qaarkood oo ah sida ay tani u ekaan karto inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-2021:

- Rosa waa 11 sano jir. Waxay taageero uga baahan tahay maamulka daawada, tuubada quudinta, qaab loo dhigo, wareejinta, taageerada dhanka quudinta iyo biyo la siiyo guud ahaan maalintii. Waxay dugsiga ku jirtaa laga bilaabo 9 subaxnimo. Ilaa 1 galabnimo, saddex maalmood toddobaadkii iyada oo jiraan dhowr biririf oo u dhaxaysa. Waxay u baahan tahay kormeer joogo ah iyada oo sababtu tahay khataro caafimaad waxayna leedahay Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed (PSW) oo aad u tababaran. Taageerada PSW-gani waxaa la bixin karaa waqti kasta, xataa inta lagu jiro maalmaha dugsigeeda, iyada oo loo eegayo baahiyaha caafimaad iyo ADL/IADL ee Rosa. Jadwalka Rosa ee PSW waxaa go'aamiyay qoyska Rosa wuuna isbeddelaa guud ahaan sanadka hadba sida loogu baahdo. PWS ay leedahay Rosa kama caawin karo Rosa imtixaankeeda xisaabta, in uu qoro curiskeeda, ma siin karo taageero labada gacmood oo is kor saaran yihiin 'hand-over-hand' si ay u qabato shaqooyinkeeda guriga, ama ma bixin karo adeegyo kale oo dhanka waxbarashada ah. Kuwaani waa mas'uulida dugsiga degmada waxaana dhici karta in loo baahdo taageerada waalidka/qoyska si loo guuleysto.

- Christopher waa 17 sano jir. Waa qof aad u madax bannaan wuxuuna u baahan yahay wax is xasuusin mararka qaarkood ah si uu u rumayo/cadaydo ilkihiisa, u beddesho dharkiisa, una qabto hawlihiisa, oo u dhaqo gacmihiisa. Wuxuu mararka qaarkood taageero uga baahan yahay wada xiriirka, sida fahamka macnaha guud ee hadalka iyo garashada sida ugu habboon ee wax looga jawaabo. Christopher wuxuu leeyahay hay'ada Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP). Christopher wuxuu leeyahay barnaamij, laba waxyaabood ka kooban, halkaasi uu shakhsi ah dugsiga u dhigto laba maalmood toddobaadkii, dhanka internet-ka ka dhigto laba maalmood toddobaadkii, oo Jimcihiina fasax yahay. Maalmaha uu isagu guriga joogo ee uu dugsiga ka dhiganayo dhanka internet-ka, DSP uu leeyahay Christopher ayaa ka caawiya in uu u diyaar garoobo maalinta isaga oo bixiya wax is xasuusinta oo diyaariya quraacdiisa. Ka dibna DSP ayaa shaqada dhammeeya, iyada oo Christopher uu si madax bannaan u qorsheysto barnaamijkiisa dhanka internet-ka, iyada oo ay jiraan dhowr caqabadood oo hadba meel ah taageero dheeraad ahna uga baahda macallinkiisa. Aabaha dhalay Christopher wuxuu ka shaqadiisa ka wataa guriga waana la heli karaa haddii ay timaado xaalad degdeg ah. Ka dib waqtiga dugsiga dhanka internet-ka, DSP uu leeyahay Christopher ayaa soo noqdo oo ka caawiya hawlaha iyo u diyaar garowga maalinta xigta. Maalmaha Jimcaha, DSP wuxuu la jooga Christopher inta badan maalintii.
- Abby wa sagaal jir. Waxay leedahay qorshaha taageerada hab-dhaqanka wanaagsan, waxayna u baahan tahay waqti nasasho oo dhanka dareenka ah oo joogto ah, fursado loogu talagalay hawlaha jireed, dhiirigelin, iyo wax is xasuusin si iyada loo dhigo mid ammaan guud ahaan maalintii. Waxay u baahan tahay qof wax kormeera oo markasta jooga meel uu ka arki karo iyada oo sababtu tahay taariikh hab-dhaqan dhaawac qofku isku geysto iyo burburinta hantida. Abby waxay dhiganaysaa barnaamij dhanka internet-ka, oo si khaas ah oo loogu talagalay baahiyaheeda gaarka ah, muddo laba saacadood ah maalimtii. Intii lagu jiro dugsiga internet-ka laga dhiganayo, PSW ay Abby leedahay la tababaray wuxuu bixiyaa dib-u-jihayn, dhiirigelin, iyo ogeysiin marka ay Abby bilawdo in ay xaalada ka dhigto mid ka sii darin oo u baahato in ay qaadato biririf degdeg ah si ay u dhaqdhaqaaqdo oo ka dibna ku soo noqoto kambiyuutarkeeda. PSW ay leedahay Abby ma bixiyo wax ka beddelka manhajka, ka qayb qaadashada go'aan qaadashada dhanka waxbarashada ama uma

dhaqmo sidii uu yahay kalkaaliyaha dhanka waxbarashada oo loogu talagalay Roda ama macallinkeeda. Eedada ay leedahay Abby ayaa guriga joogta inta lagu jirto maalintii waxayna taageerada waxbarasho iyo caawimaada shaqada guri u bixisaa hadba sida loogu baahdo.

Qoraalada Horumarka Daryeel Bixiya:
Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP) waa in ay wadaan in ay ADL, IADL, hawlaha caafimaadka iyo hab-dhaqanka la xiriira ee ay bixiyaan ee ay ku taageerayaan hadafyada ISP ee ilmaha ama dhallinyarada waaweyn ku qoraan qoraaladooda horumarka ay sameynayaan.

Su’ aalaha:
Dadka iyo waalidiinta/mas’uuliyiintu waxay Isku duwahooda Adeegyada ama Wakiilkooda Shakhsiyeed kala xiriiri karaan su’aalaha ku saabsan adeegyada la oggol yahay ee ka tirsan ISP ay leeyihiin. Intaasi waxaa dheer, in dadka iyo waalidiinta/mas’uuliyiintu ay waqti kasta codsan karaa kulanka ISP.

Wixii su’aalo ah ee ku saabsan adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo taageerada dhanka u doodida, dadka iyo waalidiinta/mas’uuliyiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay la xiriiraan kooxda IEP ee carruurta, agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmadooda, ama FACT Oregon.

Isku duwayaasha Adeegyada/Wakiilada Shakhsiyeed iyo shaqaalaha Hay’adda Maamulka Kiiska ee kale waxay la xiriiri karaan Carrie Salehiamin, carrie.a.salehiamin@dhsoha.state.or.us, with questions.